
CUTUB 1: U DIYARSANAANTA MUSIIBADA

Cutubkaan waxaad wax uga baran doontaa:

- **Musiibooyinka iyo Musiibo ka Shaqeyayaasha:** Waa maxay musiibo, yaase ay ka kooban yihiin xoogagga ka jawaaba.
- **Saamaynta Kaabayaasha:** Waxa ay keeni karaan gurmadyada ba'ani, iyo musiibooyinka gaadiidka, adeegga korantada, telefoonnada, shidaalka, cuntada, biyaha, iyo hoyga, iyo adeegyada gurmadyada
- **Khataraha Dhismeyaasha iyo kuwa Dululaatiga:** Xaaladaha kuwa khatarta leh noqon kara ee dhismayaasha iyo wixii ku jira ee waqtiga ay musiibo dhacdo.
- **Khatar Yarayn:** Maxaa la samaynayaa si loo yareeyo khatarta dhaawac ee ku iman karta deegaankaaga.
- **Diyaarsanaanta Hoyga iyo Goobta Shaqada:** Sida aad uga sii diyaargarooobi kartid yaraynta khataraha dhismeed iyo kuwa dululaati oo aadna uga bedbaadi kartid waqtiga billowga ah ee musiibo ka dambeeya.
- **Diyaarsanaanta Mujtamaca:** Sidee bay bulsho waqti hore isugu diyaarin kartaa in ay wax ka qabato musiibo aan dhicin.
- **Dhawrnaanta Shaqaalaha Musiibada:** Shuruucda shaqaalaha musiibada ka dhawra qaansheegasho.

CUTUBKA 1: U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

Soo DHAWEYN IYO ARAR

Qaybta ararta ee Buuggaaga Ardayda waxaa ku jira xog sax ah oo ku saabsan:

- Marka ay musiibo dhacdo.
- Diyaarsanaanta bulshada.
- Sida ay CERT u hawlgasho.
- Barnaamijka tababbarka CERT.

HAWL: DHISIDDA TAALLO

Tilmaan: Raac tallaabooyinka hoose si aad u dhamaystirto layliga:

1. Shan kooxood ahaan baad u shaqayn doontaan.
2. 10 ka daqiiqo ee soo socota waxaad ku bixin doontaan naqshadaynta taallo taagan oo ugu yaraan dhererkeedu yahay shan fiit oo u dhexaysa salka ilaa baarka. Waxaa lagu sheegi doonaa in aad billowdo, waxaadna haysan doontaa 5 daqiiqo oo markaa ka billaabata oo aad ku dhiso taallada.

Xirfadaha iyo awoodda aad isticmaashay marka hawshan lagu jiro ayaa ah kuwa aad u isticmaali doontaan xubno CERT ah ahaan.

ARAR IYO DULMARID CUTUBKA

HIMILADA CUTUBKA

Dhamaadka cutubkan, waa inaad kartaa in aad:

- Sharaxdo noocyada khatareed ee ay u badan tahay in ay saameeyaan hoygaaga iyo mujtamacaaga.
- Sharaxdo hawlaha CERT yada iyo doorarkooda waxqabashada degdegga ah.
- Garato tallaabooyinka loogu diyaa garoobo gurmadyada.

GURMADYADII IYO MUSIIBOYINKII KOL DHAW DHACAY

Hawlwadeennada waxkaqabashada gurmadyada waxay u wada shaqeeyaan heerar kala duwan si ay u awoodaan in ay jawaab degdeg ah bixiyaan.

Awoodda adeegga gurmada waxaa si weyn loogu sii kordhin karaa markii ay jiraan CERT yo si wacan u abaabulan, u tababararan, loona maareeyo oo awoodna u leh in ay:

- U diyaar garoobaan wagti ka horreeya dhicidda musiibo.
- Wax qabasho ka sameeya mujtamacyadooda si ay ula tacaalaan baahida degdegga ah ee ay sababtay musiibadu.

Xubno CERT ah ahaan, doorkaagu waa inad u diyaargarowdo musiibo adigoo:

- Sii ogaanaya khataraha dhisme iyo kuwa dululaati ee gurigaaga iyo goobta shaqada.
- U yaraynta khatarta ilaa xadka suuraggalka ah inta aanay musiibo dhicinba.
- Samaysiga guntid sahay musiibo ah.

CERT yadfu waxay u jawaabaan sidaatan musiibo ka dib:

- Helidda iyo deminta korantada ama gaaska, haddii ay taasi nabdoon tahay.
- Deminta dababka yar yar.
- Sii daweynta dhaawacyada halista ah inta ay ka imaanayso caawin xirfadaysan.
- Samaynta hawlgallo goobid iyo samatabbixin ah oo yar yar.
- Ku caawinta kuwa musiibada ka bedbaaday in ay la qabsadaan isku buuqidda niyaddooda.

Shaqooyinka muhiimka ah ee CERT waxaa ka mid ah:

- Ka nabdoonaanta dabka.
- Hawlo caafimaad.
- Goobid iyo samatabbixinno yar yar.
- Cilmu-nafsiga musiibada.

GURMADYADII IYO MUSIIBOYINKII KOL DHAW DHACAY

DOORARKA CERT YO WAQTIGA MUSIIBADA

Waxaa jira marar badan oo ay xubnaha CERT ka qaybgaleen wax ka qabasho musiibo.

Intii uu socday Dhulgariirkii Northridge, waxqaadyada soo socda ee CERT ayaa la diiwaan geliyey:

- Goobid: 203
- Samatabbixin: 17
- Daweyn caafimaad: 57

- Safrin bukaan: 4

- Dab xakamayn: 5

- Koranto iyo gaas xannibid: 156

Degmada Alachua, FL, intii ay ku jirtey Harikayntii Floyd ee 1999 iyo xilligii lagu jiray Duufaantii Kulaylaha ee Gordon ee 2000, CERTyada ayaa waxaa u wacay EOC si ay ula xiriiraan degganayaashi meeshaa ee baahida khaaska ah si loo hubiyo in ay dadkaasi og yihin duufaanta soo fool leh iyo in loo xaqiijiyo in ay isticmaali kari doonaan gaadiidka iyo hoyda dadka baahida gaarka ah qaba ee degmada, markii ay u baahdaan.

Ilaa darasiin CERTyo ah ayaa la isticmaalay intii lagu jiray dababkii Hidden Lake iyo Lake Louise ee 2000 si ay dabdemiyaasha cunto u siiyaan, sahayda u qaadaan, carradana wax uga diyaariyaan.

Ra'yiga CERT wuxuu ka sii ballaartay dantii asalka ahayd oo ahayd in ay jawaabaan musiibo dabadeed. CERTyada ayaa haatan la hawlgashaa markii ay gurmadyo badani dhacaan. Tusaale ahaan, degmada Whatcom, WA, xubnaha CERT ayaa loo isticmaalay xaladaha soo socda:

- Qarixii tuubbada gaaska ee Whatcom Creek (Olympic Pipeline)
- Qarixii Georgia-Pacific Pulp & Paper Mill
- Hawlgelintii Xarunta Y2K ee Hawlaha Musiibada (EOC.)
- Dhacdadii Sandy Point ee daadka iyo dabaysha
- Dhulgariirkii Nisqually

Xubnaha CERT ee ka jawaabay dhacdadii Whatcom Creek waxay ku guulaysteen abaalmarinta The American Red Cross Real Heroes. Xubnaha CERT ee degmada ayaa helay aqoonsi Federaali ah, mid Gobol, iyo mid maxalli ah.

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
CUTUBKA 1: U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

GURMADYADII IYO MUSIIBOYINKII KOL DHAW DHACAY

CERT YADA IYO DOORARKOODA AAN GURMADKA KU LUG LAHAYN

Xubnaha CERT waxay sidoo kale yihiin meel ay bulshadu ka hesho mutaddawaciin. Waxay gacan ka geysan karaan mashaariicda, sida:

- Qaybinta maaddooyinka loo isticmaalo diyaarsanaanta.
- Joogidda cooshadaha caafimaadka markii ay xaalad gaar ahi jirto.
- Ka caawinta odayaasha iyo guryaha dadka baahida khaaska ah qaba rakibaadda alaamyada ama jalaska qaaca sheega.

Sidoo kale, khudbadii Madaxweynaha ee Xaaladda Dalka ee Jannaayo 29, 2002, wuxuu dadka Maraykanka ah ku weydiistay in ay mutaddawacaan adeegooda si loo hagaajiyo loona dhawro dalkeenna. Saddexda aag ee uu ku foogan yahay dedaalkaasina waa dembiga, musiibaadka dabiiciga ah, iyo argaggixisannimada. Barnaamijka Citizen Corps ayaa loo aasaasay in uu Maraykanka ka caawiyo in ay dalabkaan waajibaadka u qaataan. Mid ka mid ah fursooyinka mutaddawacnimo ee dadka Maraykanka ah ay ka helaan dalladda Citizen Corps waa barnaamijka CERT.

Ka dib markii ay dhamaystaan tababbarka CERT oo bilow ah, xubno badan oo CERT ka mid ah ayaa doona in ay sii hagaajiyaan oo ballaariyaan xirfaddooda—iyagoo hawlgashanaya tabaynta CERT ee sida maxalliga ah loo bixiyo, iyo koorsooyinka ay bixiso The American Red Cross, ama barnaamijyo laga helo ilo kale. Qaar ka mid ah xubnaha CERT ayaa fursado tababbarro u raadsaday:

- Maaraynta Hooyga.
- Xiriirka bulshada.
- Maaraynta Deeqaha.
- Waxyaabaha khuseeya baahida khaaska ah.
- Burbur qaadis.
- Xakamaynta korantada iyo gaaska.
- Gargaarka degdegga ah oo horumarsan.
- Isticmaalka diflibareetarka is-wada.
- Xirfadaha CPR (af-ka-af).

DULMARKA KOORSADA

Cutubkani wuxuu bixin doonaa dulmaridda koorsada isagoo CERT u dejinaya mawduuc ka mid ah khataraha gaarka ah ee ay bulshadu waajahdo.

Cutubyada dambe ayaa ka hadli doona:

- Ka nabdoonaan dabeed.
- Hawlgallada gurmada ee dhinaca caafimaadka.
- Goobid oo samatabbixin yar yar.
- Ururka CERT.
- Cilmu-nafsiga gurmada.
- CERTyada iyo argaggixisannimada.

MUSIIBOYINKA IYO KA SHAQEYAYAASHA MUSIIBOYINKA

Musiibooyinku waxay noqon karaan:

- Dabiici.
- Dad-samee.
- Tignooloji.

Isja daa dhacdadee, musiibooyinku waxay wadaagaan dhawr waxyaabood oo waaweyn:

- Waxay yara yihiin kuwo aan la fileyn, oo digniin yar ama aan lahayn, fursad lagu diyaar-garoobana aysan jirin.
- Shaqaalaha iyo adeegyada la heli karo ee gurmada u taagan marka hore waxaa qargin kara baahida loo qabo adeegyadooda.
- Nololo, caafimaad, iyo bay'addaba waxay galaan halis.

Marka ay musiibo dhamaataba, baahida ayaa ka badan mid ay dabooli karaan shaqaalaha xirfadleyda ah ee adeegyada gurmadyada u taagan. Mararkaa iyaga ah, CERTyada ayaa noqda il nololeed muhiima oo ku xiran adeegyada gurmadyada.

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
CUTUBKA 1: U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

SAAMAYNTA KU TIMAADDA KAABAYAASHA

Saamaynta Dhici Karta ee Dhaawac ku Yimaada Bixiyeyaasha Adeegyada Gurmad

Dhaawac ku yimaada . . .	Saamaynaha dhici kara
Gaadiidka	<ul style="list-style-type: none">▪ Dhaawaca oon sax loo qiimayn karayn▪ Ambalaasyada oo gaari waaya dhibbanyaasha▪ Bilayskoo laga cesho gaaridda meesha rabshadaha▪ Dab-demiskoo laga cesho gaaridda goobta gubanaysa▪ Imaashada sahaydii loo baahnaa oo kala go'da
Dhismeyaasha	<ul style="list-style-type: none">▪ Isbitaallo dumay oon si caadi ah u shaqayn karaynin▪ Khatar uu keeno burburka daadanaya
Hababka Warisgaarsiinta	<ul style="list-style-type: none">▪ Dhibbanyaasha oon caawin u wacan karayn▪ Agaasimidda adeegyada oo caqabadi ku timaaddo
Yutiilitada (Korantada, gaaska, iwm.)	<ul style="list-style-type: none">▪ Lumidda yutiilitida▪ Khatar badan oo dab kaca ama shoog koranto oo dhaca▪ Wadaxiriirka dhibbanyaasha iyo adeeg bixiyeyaasha oo luma▪ Sahay biyo oon ku fillayn▪ Khatar saayida oo ku timaadda caafimaadka bulshada
Adeegga Biyaha	<ul style="list-style-type: none">▪ Awoodda dab-deminta oo koobanta▪ Dhismayaasha caafimaad oo caqabadi ku timaaddo
Bixiyeyaalka Shidaalka	<ul style="list-style-type: none">▪ Khatar dabeed ama qarax ka yimid meesha uu gaasku ka liigay▪ Khatar cabbudhideed (asphyxiation)

Sababtoo ah in ay shaqaalaha mashaqadu helayaan sahaydii loo baahnaa mid ka yar, sahayda loo helo bulshada waa in loo isticmaalaa sida ay dadka dhibban u kala baahi badan yihiin.

- Bilayskaa wax ka qabanaya dhacdooyinka sida khatarta ah u saameeya nabdoonaanta bulshada.
- Dab-demiyeayaasha ayaa xakamaynaya dababka waaweyn.
- Shaqaalaha EMS ayaa wax ka qabanaya dhaawacyada naf-gooyada ah. (Si kastaba, CERTyada ayaa la sii tacaali doona dhaawacyada naf-gooyada ah inta laga helayo unugyada EMS.)

Baahiyaha kale oo hoose waa in loola tacaalo siyaabohooda kale.

KHATARAHA DHISMAYAASHA IYO DULULAATYADA

Xiridda ama laalidda yutiiliti waa sida ugu fiican oo loo yarayn karo —ama loo dhimo—khatarta inta aanay dhicin musiibadu. Xiridda utiiliti waa hal dariiqo ah oo loo dhimo ama loo yareeyo khataraha musiibo ka dib.

Tallaabooyinka dhimidda oo ay tahay in la sameeyo dhicidda musibo ka hor iyo markii ay sii dhacaysayba waxay ku xiran yihiin khatarta iyo nooca dhismaha. Mawduucani wuxuu ka hadli doonaa noocyada dhismeyaasha iyo khataraha mid waliba ku tacalluqa. Taxaddarrada nabdoonaanta, oo ay ku jirto dhimidda khatarta ku timaadda dhismeyaasha iyo dululaatiyadaba, ayaa laga hadli doonaa markan.

KHATARAHA KU TACALLUQA NOOCA DHISMAHA

Waxaa laga yaabaa in aadan helin fursad aad ku doorato nooca dhismaha aad ku jiri doontid markay musiibo dhacdo. Waxaa markaa uhiima inaad ogaatid khatar noocee ahaa ka timaadda noocyada dhisme ee kala jaadka ah ee mujtamaca ku dhex yaal.

Dhismayaasha aadka loo hindisay sida guryaha aadka u dhaadheer, ayaa si wanaagsan noqda inta badan markii ay musiibo dhacdo. Markiise uu dhaco dhulgariir iyo dhacdooyinka dabaylaha sare (sida torneedada iyo harikaynta), dhismayaasha sare ee gaboobay ayaa laga yaabaa in uu dhaawac kaga yimaado:

- Quraarad burburtay.
- Baanil soo dhaca.
- Jaranjarooyin iyo marin-koreedyo soo dhaca.

Da'da, nooca dhismaha, iyo nooca musiibada ayaa ah saameeyayaalka waaweyn ee dhaawaca suuraggalka ah ee soo gaara guryaha dhanka u go'an iyo garaashyada.

- Guryihii la dhisay ka hor 1940 guud ahaan lagumaba musbaarin aasaaska, taasaana looga baqaa in ay ruxdaan, liiqliiqdaan, ama ay ka kacaan aasaaskooda.
- Guryaha gaboobay ee laga sameeyey bulukeeti aan la adkayn ayaa ka degganaan yar dhismeyaasha ka cusub.

Xusuusnow in:

- Dhaawaca ay guryaha keliga ah u geystaan torneedada iyo harikaynta ayaa kala ah min dhaawac yar ilaa dumin dhamaystiran.
- Ka dib dhacdada uu ku dhaawacmay dhisme, waxaa jira khatar kale oo ka iman kartaa dhaawacaas, sida dab ka yimaada beebka gaaska oo dillaacay.

KHATARAHA DHISMAYAASHA IYO DULULAATIIYADA (WELI SOCDA)

Guryaha guurguura ayaa ugu jilicsan dhaawaca sababtuna waa iyadoo si sahlan loo gembin karo. Marka ay gembintani dhacdo, waxaa xumaanaya yutiilitidii isku xirraa oo dhan taasoo kordhin karta khatarta dab iyo shoog koranto.

Moolalka, meelaha isboortiga, madaarrada, meelaha cibaadada, iyo meelaha kale ee leh saqaf dheer ayaa khatar badan lahaan kara markii ay jirto nooc ka mid ah musiibooyinka. Tusaale:

- Xarumaha quraariga ah ee iibsiga ayaa keena khatar ka timid muraayado jajabay.
- Dhismooyinka sida bakhaarrada u dhisan iyaguna way dumi karaan.

Waxaa kale oo jira khataro ku yimaada dhamaan dhismayaasha oo uga imaada khataraha dululaatiyeed.

KHATARAHA DULULAATI

Cid kastaa khatar ayay ugu jirtaa guryeheeda ama goobaha shaqad. Kabayada ama ashyaada guri ku dhex yaal, ama garaaash, ama meel shaqo waxay keeni karaan khatar markii ay jirto ama uu dhamaato musiibo. Qaar kale oo khataraha ah waxaa ka mid ah:

- Dillaac beebka gaaska oo ka yimaada kululeeyayaasha biyaha ama raanjiyo ay lulidda biyaha ama dabayshu ka qaadeen meeshoodii.
- Dhaawac ka yimaada buugag, weelal, ama waxyaabo ku jira kabarrada oo soo daata.
- Khatar ah dhaawac ama shoogga korantada oo ka yimid qalab xafiis ama aalado kale oo meeshoodii ka sikaday.
- Dab ka yimid xirid khaldantay, soker buuxdhaafay, iyo xargo koranto oo fiiqmay.

Waxaa jira tallaabooyin yara sahlan oo ay shakhsiyaadku qaadi karaan oo yarayn kara khataraha guriga iyo meesha shaqada.

DHIMIDDA KHATARTA

Waa muhiim in aad ogaato saamaynta ay keeni karaan waxyaabaha dhici kara, oo ay ku jiraan suuraggalnimada fal argaggiso. Inta ay le'eg tahay xogta aad hayso, ayay ku xiran tahay wanaagga sida aad wax u qorshaysan karto oo arrintaana wax uga qaban karaysid.

Ka soo tag dhacdada iyo xaddiga laga digey, waxaa jira taxaddarro nabdoonaaneed oo aad adigu samayn kartid si aad u yarayso ama ugaba hortagto dhaawac. Qaybtan ayaa ka sheekayn oonta tallaabooyinka lagu xaqiijiyo nabdoonaanta.

Qaybta soo socota waxay ka sheekayn doontaa:

- Diyaarsanaanta hoyga iyo meesha shaqada.
- Diyaarsanaanta mujtamaca.

DHIMIDDA KHATARTA (WELI SOCONAYSA)

NABDOONAAN SHAQSIYEED

Tallaabooyinka nabdoonaanta shaqsi waxay ku xiran yihiin:

- Nooca dhacdada.
- Xaddiga digniinta ee aad haysatid.
- Haddii aad gudaha ku jirtid, dibedda joogtid, ama gari waddid.

Ilaalinta naftada inta musiibo ay socoto waxay u baahan tahay qorshe. Waxaa jira tallaabooyin ay tahay in aad qaaddo si aad u joojiso ama u dhinto dhaawaca ay khataraha inta badan geystaan. Tallaabooyinka waxaa la qaadi karaa aad uga hor dhicidda musiibada, inta lagu guda jiro musiibadada, iyo ka dib dhicidda musiibada.

DIYAARSANAANTA HOYGA IYO MEESHA SHAQADA

Diyaarsanaanta ayaa fure u ah ka bedbaadidda musiibo. Shaqsiyaadka, oysaska, iyo maareeyayaasha dhismayaasha waxay qaadi karaan tallaabooyin ku caawiya dhimidda khataraha dhismayaasha iyo dululaatiga, waxay sahli karaan baxsasho, waxaanay kordhin karaan bedbaadidda marki ay musiibadu dhacday ka dib oo u dhaw.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA

Diyaarsanaanta guriga iyo goobta shaqada waxaa ka mid ah:

- Yaraynta khataraha dhismaha iyo dululaatiyada.
- Diyaarin shaqsi ah, sida:
 - Isku duwashada guntin sahay musiibo ah.
 - Samaysiga qorshe musiibo.
 - Samaysiga guri nabdoon oo ku yaal meel nabdoon oo guriga ka mid ah (haddii lacalla ay madaxdu guriga joog ku yiraahdaan).


DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)

KHATARAHA DHISMAYAASHA IYO DULULAATIIYADA

Taxaddarrada Khataraha Dhismayaasha iyo Dululaatiyada

Nooca Khatarta	Taxaddar Tusaale ah
Dhisme	<ul style="list-style-type: none">▪ Ku musmaar guryaha gaboobay asaaska.▪ Duub haamaha gaaska.▪ Yutiilida sare u qaad (meel ka sarraysa meesha daadku gaari karo).▪ Ku xidh guryaha guurguura salkooda adag.▪ Weydii inuu xirfadle kuu eego aasaaska, xirmada saqafka, shooladda, iwm.
Dululaati	<ul style="list-style-type: none">▪ Ku xir faraajiinta sida rixlaha buugga, surmada, saacadaha derbiga debiga.▪ Ku hubi aalaadka iyo qalabka xafiiska meel la hubo, isticmaalna Velcro® u adag sida kuwa warshaadka.▪ Ku hubi albaabyada saableyda adkeeyayaal aysan carruurto furi karayn.▪ Hel oo calaamee xirmooyinka gaaska, korantada, iyo biyaha intii aanay musiibo dhicin. Ka dib musiibada, xir yutiilida sidii logu talaggalay si ad uga hortagto dabab iyo khataro kale. Dhig kiyaawaha wax lagu xiro meel hadhow laga heli karo.▪ Ku hubi kululeeyayaasha biyaha derbiga si aad uga ilaalisid beeb gaas oo dildillaacay ama fiilo koronto oo fiiqan.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)



Deminta Utiiliti (Biyaha, Gaaska, iyo Korantada)

Deminta Utiiliti: Biyaha, Gaaska, iyo Korantada. Hannaanka deminta korantada waxay ku tusi sanduuqa iswijka iyo kan fiyuuska wuxuuna ku sii tusaa laba tillaabo. Tallaabada 1aad waa in aad demise kuwa keliga u joojiya (ama dinaca kale u wareeji iswijka.) Xiridda biyaha. Tallaabada 2aadna waa inaad sirkutka guudba xidhaa (sanduuqa guud ee iswijyada). Xiridda biyaha waxay muujinaysaa dhinaca kale oo rubbineetada loo wareejiyo, iyo iyadoo dhinaca dabamarka ah loo wareejiyo si loo sii daayo biyaha. Shaxanka gaas-beegga ah ayaa muujinaya badhanka laga demiyo iyo meesha uu ku yaal beebka dhulka ka soo baxa. Si aad u xidho rubbineetada gaaska, adigoo kiyaaale isticmaalaya hal/afraad u wareeji dhinaca ay sacaddu u socoto.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)

Iyadoo ay ku xiran tahay nooca musiibada, ayay khatar dululaatiyeedyada kala duwani keeni karaan khataro kala duwan. Bixi dhawr tusaale oo tallaabbooyin taxaddarid ah, una xawil ka qaybgalayaasha websaytka FEMA ee *Talking About Disasters* (Marka Musiibooyin Laga Hadlaayo) si ay xog badan oo qoto dheer uga helaan: www.fema.gov/rrr/talkdiz/.

- Dabka Guryaha: Hubi in ay qataarrada tuug-celiyeyaasha ah iyo qataarraada bannaanka ee dariishaduhu sahlan tahay in la furo.
- Dhuljeex/Dhiiqo-guur: Rakibo dhuujiyeyaal balaastiig ah si aad uga hortagto liigidda biyaha ama gaaska. Dhuujiyeyaasha debacsan baan inta badan dillaaci karaynin.
- Dabduurrada:
 - Iska ilaali inaad geedo iyo jaqafyo u isticmaashid saqaf ahaan.
 - Fal oo ka durji dhamaan cawska guban kara ilaa 30 fiid oo guriga ah. Ka fogee saaqsaqa derbiga guriga.
 - Gaaska ilaa 30 fiid ka fogee guriga iyo dhismeyaasha kale.
 - Xabada ku ururso ugu yaraan meel 30 fiid u jirta guriga oo taagna ah

SAMAYNTA QORSHE MUSIIBO

Qorshe masiibo wuxuu la micne noqon karaa farqiga u dhexeeya nolol iyo geeri. Tusaale ahaan:

- Sideed uga fakan doontaa guriga?
- Xaggeed kula kulmi doontaa caa'iladaada?
- Marinkeed ka qaadan doontaa meesha aad deggan tahay haddii ay daldalasho muhiim noqoto? Ma leedahay marin kale haddii uu lacalla xirmo marinkaagii ama uuba noqdo midaan la mari karin?
- Maxaad qaadanaysaa?
- Xaggeed aadeysaa?
- Maxay tahay inaad horay meel u dhigato? Ma haysataa alaabtaa oo kugu filan (ama alaab kugu filan)?

Waa inaad u samaysaa su'aalaha "Bal ka warran?" (Maxaan yeelayaa haddii ay tani dhacdo?) khatar kasta oo halis ku keeni karta mujtamaca. Dabadeed guriga ka billow oo kor u sii soco adigoo ka jawaabaya su'aalahaas.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)

Jawaabaha su'aalahani way kala duwanaan karaan, taas oo ku xiran nooca musiibada, mana u badna inaad u diyaarsanaan kartid dhacdo kastoo dhici karta. Adigoo samaynaya "Ka warran haddii?" oo ku saabsan khataraha halista sare leh, waxaad si wacan ugu diyaarsanaan doontaa halis kasta oo dhici karta.

ABUURIDDA QORSHE MUSIIBO OO QOYS**Si aad u bilowdo. . .**

- La xiriir xafiiskaaga maxalliga ah ee maaraynta musiibooyinka iyo qaybtaada maxalliga ah ee The American Red Cross.
 - Ogow musiibooyinka ay u badan tahay in ay ka dhacaan mujtamaaga.
 - Weydii sida laguugu digo doono.
 - Ogow sida loogu diyaar-garoobo nooc kasta oo musiibo ah.
- La kulan qoyskaaga.
 - Kala sheekayso noocyada musiibo ee dhici kara.
 - Sharax sida loogu diyaar-garoobo waxna looga qabto
 - Ka hadla waxaad samaynaysaan haddii laydinkula taliyo inaad guurtaan.
 - Muraajacee waxaad ka hadasheen.
- Qorshee sida uu qoyskaagu u xiriiri doono haddii ay kala lumiso musiibadu.
 - Isla garta labo barood oo kulan:
 - ▼ Meel in uusan dab ka soo gaarin u jirta gurigaaga, waa haddii uu dab dhacee.
 - ▼ Meel ka yara baxsan darsaashaada, haddii aad lacalla soo guryo noqon weydaan.
 - Doorro saaxiib gobol kale deggan oo "xiriir xiriiriye" ah si uu qof kasta u waco.
- Dhamee tallaabooyinka soo socda.
 - Telefoon kasta ag dhig lambarrada gurmada.
 - Tus xubnaha msuulka ah ee qoyska sida loo xiro biyaha, gaaska, korantada oo looga xiro looxa iswijka ee weyn.
 - Dab-sheege ku rakibo dabaq kasta oo gurigaaga ah, gaar ahaan sariiraha agtooda, bil kasta tijaabi beteryadana ka beddel laba jeer sanad waliba. (Bateriyada beddel markii aad qufullada beddelanaysid guga iyo dayrta.)

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)


- La xiriir waaxdaada dabdemiska ee maxalliga ah si aad wax uga baratid khatarta dabka guryaha ka kaca.
 - Baro gargaarka degdegga ah iyo CPR. La xiriir qaybtaada maxalliga ah ee The American Red Cross si aad xog iyo tababarba uga heshid.
- La kulan deriskaaga.
 - Qorsheeya sida uu derisku u wada shaqayn lahaa musiibo ka dib. Ogow xorfadda (caafimaad, farsamo) ee deriskaaga).
 - Ka fakir sida aad u cawin karto derisyada qaba baahida khaaska ah, sida waayeelka, ama dadka naafada ah.
 - Qorshe carruur hayn samayso haddii uu lacalla waalidku guriga iman waayo.

QORSHAYNTA FAKASHADA

Samee qorshe baxsasho oo qol kasta siina meel looga fakado. Qorshahaaga fakashadu waa in uu tixgeliyaa:

- Ka fakir baahida carruurta iyo dadka jir ahaan wax ku adag yihiin.
- U sheeg qorshaha dhamaan qoysaska reerka ama shaqaalaha xafiiska.
- Samee muraajacayn ama baroobayn fakashada.

Tusaale qorshe fakasho ah ayaa ku yaal shaxanka soo socda.



Qorshe fakasho qoys ah oo tusaale ah iyo leebab tusaya marinka fakashada qol waliba oo guriga ka mid ah iyo meel ay qoysku ku kulmaan oo bannaanka ah.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA (WELI SOCOTA)

Sahayda musiibo eek u jira diiwaankan waa mid dhamaystiran, waana inaad go'aansataa sahayda aad ugu baahan tahay bixidda, kuwa aad hoyga gabbaadka ah ugu baahan tahay iyo kuwa aad labadaba ugu baahan doonto.

- Sahayda bixidda-keliya iyo sahayda (tus., dawada lagu qoray) ee loogu baahan yahay bixidda iyo gabbaadka waa in lagu kaydshaa meel looga qiimayn karo si degdeg ah markii la galo xaalad bixitaaneed.
- Sahayda gabbaad-joogga (tus., 3 beri oo biyo ah xubin kasta oo qoyska ka mid ah) waa in lagu kaydiyaa meel looga sii gaari karo guriga iyo goobta shaqada.

Isu-geyta iyo Kaydinta Guntin Sahay Musiibo

Waxaad si wanaagsan ula qabsan kartaa xaaladda inaad musiibo u diyaargarowdo ka hor inta uusan dhicin. Hal jid ah oo loo diyaariyo diyaarinta guntinta sahay musiibo. Markii ay musiibo dhacdo, ma heli doontid waqti aad ku dukaamaysato ama u raadsato sahay. Haddiise aad horay u urursatay sahayda, adiga iyo qoyskaagu waxaad u babac dhigi kartaan bixid ama guri ku ekaasho.

Si aad u Diyaarsato Sahaydaada

1. Dib u eeg liiska ku yaal dhawrka bog ee soo socda (Ka bilow FEMA L-189, ARC 4463, Guntintaada Sahayda Musiibo ee Qoyska).
2. Aruurso sahayda ku qoran liiska.
3. Ku rido sahayda weel sahal loo qaadi karo sahayda aad u baahan doonto haddii loo baahdo in la guuro. Sahaydaasi waxay ku calaamadsan yihiin xiddig (*).

Biyo

Ku rido biyo weelal balaastiig ah sida biye-qaadyada jilicsan. Ka fogow isticmaalidda weelasha jaba ama habca sida karaatiinta caanaha iyo dhalooyinka biyaha. Qofka sida caadiga ah u firfircoon waxuu maalintii u baahan yahay ugu yaraan laba kuwaarto maalintii. Bay'aadka kulul iyo dhaqdhaqaaqa aadka u badan ee jir ahaaneed wuxuu laballaabi karaa baahidaa. Carruurta, hooyooyinka nuujnaya, iyo dadka buka waxay u baahan karaan intaa ka badan.

- Qof kasta ugu talaggal 1 gaaloon oo biyo ah maalin waliba (2 kuwaarto oo cabis ah, 2 kuwaarto oo diyaarin/nadiifin ah.)*
- Hayso ugu yaraan sahay 3-beri oo biyo ah qof kasta oo qoyskaaga ka mid ah.

Haddii aad su'aalo ka qabtid tayada biyaha, sifee intaadan cabin. Waxaad karkarin kartaa biyaha ilaa ay falfalaan muddo hal daqiiqo ah ama waxaad isticmaali karaysaa kaniinnada la iibsado oo biyaha nadiifiya. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa kaloriinta hoorka ah haddii ay saafi tahay, oon lagu darin waxba, 5.25% oo soodiyam haybokollorayt ah. Si aad biyaha u nadiifiso isticmaal shaxanka hoose si uu kuu hago:

Saamiyada Sifaynta Biyaha Kaloriin

Xaddiga Biyaha	Kalorinta lagu Darayo
1 kuwaarto	4 Dhibcood
1 Gaaloon	16 Dhibcood
5 Gaaloon	1 Qaaddo

Saamiyada Sifaynta Biyaha Kaloriin: Xaddiga Biyaha iyo Kaloriinta lagu Daray

Intaadan ku darin kaloriin, rux oo gilgil weelka biyaha oo u kaadi ha istaaageene 30 daqiiqo intaadan cabbin.

Isu-geyta iyo Kaydinta Guntin Sahay Musiibo

Cunto

Kaydso ugu yaraan sahayda 3 beri oo cunto aan qurmin ah. Xulo cuntada aan u baahnayn firinjiyeer, ama diyaarin, karinta, iyo biyo, ama biyo yarba u baahan. Hadday tahay inaad cunto kululaysato, isku duwo daasad dhan oo Sterno[®] ah. Xulo shayada cuntada ah ee diyaarka ah fududna. Ku darso qaar ka mid ah cuntooyinka soo socda guntinta cuntada ee sahaydaada musiiibo:

- Hilibka qasacadaysan ee cunid-u-diyaarka ah miro iyo khudaar
- Juuska qasacadaysan, caano, maraq (haddii ay budo yihiin, ku dar biyo dheeraad ah)
- Daruuri—sokor, cusbo, basbaas
- Cuntada tamarta sare—subagga lawska, malmalaaddo, qajacle, garanooa, iyo tareel migis
- Cuntada dhallaanka, dadka gaboobay, iyo dadka cuntada gaarka ah cuna
- Cuntada raaxada/welwelka—buskudh, nacnac adag, buunshe macaan, lolibaab, kafee buda ah, caleen shaah

Walxaha Jikada

- Qasac fure
- Weelasha wax lagu rito ee xaashida ama balaastiigga ka samaysan
- Middi meel-gale ah
- Kalooriinta qoyska si loogu nadiifiyo biyaha la cabo
- Sokor, cusbo, basbaas
- Xaashida aluminum ama bacda wax lagu xiro
- Qariiradka bacda ah ee xirma
- Hadday tahay in cuntada la karsho, qaado burjiko gaas iyo qasac shidaalkeeda ah

Isu-geyta iyo Kaydinta Guntin Sahay Musiibo

Guntinta Gargaarka Koowaad*

Isku duwo guntin gargaar degdegga ah oo gurigaaga iyo gaari kasta. Guntin sahay gargaarka koowaad waa inay ku jiraan:

- Buugga gargaarka koowaad
- Faashado koollo leh oo noocyo kala duwan ah
- Cadad faashado nadiif ah ee 2-inji ah (4-6)
- Cadad faashado nadiif ah ee 4-inji ah (4-6)
- Sharooto koollo leh oo xasaasiyadda u adkaysata
- Faashado saddex-xagal ah (3)
- Irbad
- Tuwaallo qoyan
- Goojo lid-bakteeriyo ah
- Heerkul-beeg
- Xalafka carrabka lagu xajiyo (2)
- Qandi jelli ah ama duxeeye kale
- Noocyo biinnada sugidda ah oo kal jaad ah
- Saabbuun nadiifiye ah
- Galoofyada Latex (2 joog)
- Jellida batrooliyam
- Cadad suuf ah
- Hariye
- Cadad faashado duuban ah ee 2-inji ah (3 duub)
- Cadad faashado duuban ah ee 3-inji ah (3 duub)
- Maqas
- Qabadeyaal

Dawada aan la Qorin

- Xanuun baabbi'ye Aspirin ah ama aan ahayn Aspirin
- Dawada lid-shuban
- Lid-aashito (calool kaca)
- Sharoobbada *Ipecac* (oo loo isticmaalo keenidda matag, hadday ku taliyaan Xarunta Xakamaynta Sunta)
- Laasatiibo
- Fiitamiinno
- Dhuxul la hawlgesho (oo loo isticmaalo haddii ay ku taliyaan Xarunta Xakamaynta Sunta)

Qalabka iyo Sahayda

- Alaabta fur-oo-tuur, koobxaashiga, iyo maacuunta*
- Buugga u diyaarsanaanta Gurmada*
- Raadiyo beteri ku shaqeeya iyo beteri kayd ah*
- Toosh iyo beteri kayd ah*
- Dab demiye: Dhiisha yar, Nooca ABC
- Tuubbo teendho
- Dhigo
- Sharootada cawlan
- Jiheeye
- Tarraq ku jira weel biyo-ma-galeen ah
- Foolyada Aluuminam
- Weelasha caagga ee kaydka
- Calaamadaha wirqa
- Xaashi, qalin qori
- Cirbad, dun
- Galoofyada shaqada
- Dawo siiye
- Kiyawaha xira, biyaha gaaska qoyska
- Firimbi
- Bac dermeed

Nadaafad

- Xaashida musqusha, shukmaaneto*
- Saabuun, hoor lidjeermi ah*
- Sahayda dumarka*
- Walxaha nadaafadda qofka*
- Kolayga bacda ah ee qashinka qaada (nadaafadda qofkaa loo isticmaali)
- Baaldi caag ah oo fur adag
- Lid-caabuq
- Kalooriinta qoyska

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
CUTUBKA 1: U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

Isu-geyta iyo Kaydinta Guntin Sahay Musiibo

Dhar iyo Gogol

Ku dar ugu yaraan hal lebbis oo dhar iyo kabo ah qof kasta.

- Kabo adag ama buud shaqo*
- Gashiga roobka*
- Bustooyin iyo baagga jiifka*
- Koofi iyo galoofyo*
- Kastuumooyin kulayl leh*
- Okkiyaalaha qorraxda*

Dukumiintiyada iyo Lambarrada Xiriirka ee Qoyska

- Aqoonsiga shaqsi, lacag (xitaa sarrif) ama jeegga safraaga ama kaarka deynsiga
- Nuqullo xaashiyaha muhiimka ah: shahaado dhalasho, shahaado guur, shatiga wadennimada, kaararka sooshal sekuuriti, baasaboorro, dardaaranada qoran, qoondaynta, layska alaabta qoyska, xaashiyaha caymiska, waraaqaha tallaalka, lambarrada akoonnada bangiga iyo karaka deynsiga, istoogyada iyo curaarrada. Hubi inaad kuwan ku kaydsato weel biyo-ma-galeen ah.
- Liiska bud-dhigaha iyo lambarrada telefoonnada
- Khariidad aagga ah iyo telefoonnada meesha aad aadi kartid
- Furayaasha gaariga iyo kuwa guriga oo gooni ah oo dheeraad ah

Walxaha Gaarka ah

Xusuusnow xubnaha qoyska ee baahida gaarka ah qaba, sida dhallaanka iyo waaayeelka ama dadka naafada ah.

Cunugga*

- Foormala
- Xafaayad
- Dhalooyin
- Caano boodhe
- Dawooyin

Dadka waaaweyn*

- Dawada wadnaha iyo dhiig karka
- Insulin
- Dawooyinka loo qoray
- Baahida ilkaha macmalan
- Indha-galaha iyo sahaydiisa
- Okkiyaale dheeraad ah oo aragga

- Madaddaalo—cayaaro iyo buugag
- Xashiyaha muhiimka ah ee qoyska —ku kaydi kuwaan weel biyo-ma-galen ah oo la qaadi karo
- Dardaaran, caymis, qoondo, istoog, iyo curaarro
- Baasaboorro, kaararka sooshalka, waraaqaha tallaalka
- Lambarrada akoonka bangiga
- Lambarrada akoonnada iyo shirkadaha kaararka deynsiga
- Diiwaanka alaabta qiimaha leh ee guriga
- Lamabarrada telefoonnada muhiimka ah

*Items marked with an asterisk are recommended for evacuation.

DIYAARSANAANTA GURIGA IYO GOOBTA SHAQADA(WELI SOCOTA)

BIXITAANKA MISE MEEL KU GABBASHADA?

Iyadoo ku xiran xaaladda iyo halista, haddana go'aanka ama in la guuro ama meel lagu gabbado maahan had iyo jeer mid sahlan. Haddii ay waqtiga iyo meeshu oggolaadaan, waa inad dhegaysataa Habka ka-Qaylinta Gurmada (Emergency Alert System (EAS) adigoo ka raba tilmaamo ku saabsan qiimaynta ay xaaladda ku sameeyeen xirfadleyda maaraynta musiibooyinka.

Baro hannaanka bixidda iyo meel ku gabbashada ay ku leeyihiin khatarta ka jirta aaggaaga.

DIYAARSANAANTA MUJTAMACA

Diyaarsanaanta muwaaddinku way saamayn yar tahay haddii aanay bulshadu diyaarsanayn. Wakiillada dhamaan hay'aadka doorka ku leh wax qabashada waa in ay wada shaqeeyaan oo isku duwaan waxqabadka hay'adahooda inta aanay musiibo dhicin. Waxa ka soo baxa dedaalkoodaas ayaa loogu yeeraa Qorshaha Hawlgallada Xaaladda Degdegga ah ama Gurmada EOP.

QORSHAHA HAWLGALLADA XAALADDA DEGDEGGA AH (EOP)

EOP waa xaashiyo:

- Xilsaara masuuliyadda una xilsaara ururrada iyo shakhsiyaadka in ay qabtaan tallaabooyin gaar ah waqtiyo la saadshay iyo meelo la carrifay markii ay dhacdo musiibo ka badan awoodda iyo masuuliyadda ay gudan karto hal hay'ad ah (tus., waaxda dabdemiska).
- Sii sheegaa kala teednaanta madaxda iyo xiriirka ururrada iyadoo muujin sida hawlaha loo agasimi doono.
- Qeexaa sida dadka iyo hantida loo dhawri doono inta lagu jiro mahsaqooyinka iyo musiibooyinka.
- Meel ku ogaadaa shaqaale, qalab, dhismeyaal, iyo sahayda laga heli karo—meeshaa iyada ah, ama heshiis lagula jiro meelo kale—si loo isticmaalo xilliga lagu jiro hawlgalka soo kabashada iyo wax qabashada.


Haddii la soo gaabsho, EOP waxay qeexdaa sida ay bulshadu wax u qabsan doonto markay gurmada ku habsato.

DIYAARSANAANTA MUJTAMACA (WELI SOCOTA)

DIYAARSANAANTA MUJTAMACA IYO CERTYADA

Mujtamacyadu waxaa kale oo ay musiibo ka diyaargaroobaan marka ay aas-aasaan Kooxaha Ka-jawaabidda Musiibada Mujtamaca (Community Emergency Response Teams CERTs) si ay uga jawaabaan musiibada aagooda ka dhacda haddii maaraynta sahayda la tahli waayo ama ay gaarsiinteedu daahdo. CERTyada ayaa iyagoo ku salaynaya hannaankooda halbeegga ah ee ay ku shaqeeyaan waxay sameeyaan in ay:

- Caawinta jawaabayaasha koowaad.
- Qabasho qaar ka mid ah hawlihii ay qaban lahaayeen shaqaalaha jawaabta:
 - Nabdoonaan dabeed
 - Goob oo samatabbixi yaryar
 - Hawlgallo caafimaad



Ururka CERT

Waxa ugu sarreeya Wakiilka Waaxda Dabdemiska. Waxaa ka hooseeya Hoggaamiyaha Kooxda CERT oo agaasima hawlaha afarta qaybood: Hawlgallada, qorshaynta, Sahayda, iyo Maamulka.

Tan ka hoosaysa Qaynta Hawlgallada waa saddex koox jawabeed: Dab Xakamaynta, Goobid Samatabbixinta, iyo Dawada. Hoosta Waaxda Qorshaynta waxa ku yaal laba qaybood: Xaashiyayn, iyo Marxaladda Dhacdada.

Micne ma leh hawsha ay xubnaha CERT u xilsaaran yihiine, CERTyada waxgalka ahi waxay u baahan yihiin wadashaqayn.

ILAALINTA SHAQAALAHA MUSIIBADA

Waa mutaddawiciin, oo xubnaha CERT ee ka shaqaynaya adeegyada gurmadyada waxaa si guud u ilaaliya sharciyada “Good Samaritan” oo iyagu dhawra dadka u bixiya daryeelka gurmada si taxaddar iyo macquulnimo leh.

Gurmad dhexdiisa, xubnaha CERT waxaa sidaa oo kale ilaaliya *Volunteer Protection Act* ee 1997, oo ah sharci Federaali ah oo dhawra mutaddawiciinta inta ay ku hawlgalayaan tababbarradii ay hore u qaateen.

Dadka ku deeqa adeegooda waqtiyada musiibada waxaa si guud u dhawra sharciyo, Federaali, goboleed ama/iyo maxalliba ah. Inta badan gobollada waxay leeyihiin sharciyo “Good Samaritan” ah oo ilaaliya dadka u bixiya daryeelka caafimaad *si habboon oo habboon* oo siiya dadka buka ama dhaawacan. Waxaa kale oo la dabbakhi karaa sharciyo degmo, magaalo, ama Gobol. Macallinkaaga ayaa ku siin xog ku saabsan sharciyada ku saabsan aaggaaga. Diiwaangeli qodobbada muhiimka ah ee hoose si aad mustaqbalka u isticmaasho.

Sharciyada la Dabbakhi Karo	Qodobbada Muhiimka ah

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA

CUTUBKA 1: U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

GABAGGABADA CUTUBKA

CERTyada waxay ka mid yihiin hay'ado iyo shaqaale kala duwan oo wada shaqeeya si ay caawin u bixiyaan gurmada ka gadaal. Sababaha waxgalnimada CERT waxay ku jiraan:

- Ogaanshaha noocyada dhacdooyinka ah ee khatar sare ku keeni kara iyo dhibaataada natiijo ahaan uga imaan karta.
- Diyaarsanaan ku filan dhacdo kasta iyo wixii ka dambeeya.
- U tababarashada hawl-qabadyada ay CERTyadu u xilsaaran yihiin.
- Ku tababarashada muraajicada iyo matalaadda.

CERTyada waxay ku can baxeen in ay muhim u yihiin meelaha lagu tijaabiyey. Bulshadanna waxay u noqon karaan kuwo aan laga maarmin.

CERTyada waxay noqdeen qayb muhiim ah oo ka mid ah President Bush's Citizen Corps-yadiisii.

SHAQO GURI IYO LAYLI

Cutubka xiga wuxuu ka hadli doonaa nabdoonaanta dabka. Casharka kan xiga ka hor waa in:

1. Aad aqridaa oo fahamtaa Cutubka 2: Nabdoonaanta Dabka ee Buugga Ardayga.
2. Keento galoofyo magad ama saan ah iyo muraayadaha bedbaadsanaanta si aad ugu isticmaasho dab xakamaynta, ayna u noqdaan billowgii guntintaada sahayda musiibada.
3. Billowdo kaydsga cunto iyo biyo oo ku filan adiga iyo qoysaskiinna ugu yaraan 3 beri.
4. Samayso xiriir gobolka-ka-baxsan.
5. Ogow meelaha gurigaaga ee laga xiri karo yutiilitiga.

Xiro dhar ku habboon casharka soo socda (Dabaggaab iyo kabo furan toona maya), waayo waxaad baran doontaa sida dab yar loogu demiyo dab damiye yar.
